

Ka Warbixi Dhacdo Nacayb Dhiiri Gelinaysa si Onleyn ah

Unugga EPS ee Dembiyada Nacaybka

Neceybku qof kasta wuu saameeyaa: Marka dembi ama dhacdo uu nacaybku sababay ay dhacdo, ma dhaawacayso dhibbanaha oo keliya ee bulshada oo dhan ayay dhibaysaa.

BOOLISKA WAC

haddii ay tani tahay xaalad naf-gooyo ah, ama dembi socda, wac 911 isla markiiba

Adeegga Booliska Edmonton ee Adeegga Warbixinta Booliska Onleynka ah wuxuu kuu ogolaanayaa inaad soo gudbiso warbixinta dhacdada nacaybka ku salaysan isla markaaba.

Waa INAADAN xerayn warbixin onleyn ah haddii mid ka mid ah kuwan soo socdaa run tahay:

- Waxaad ku jirtaa khatar degdeg ah - haddii ay sidaas tahay, wac 9-1-1.
- Waxaa jira cadaymo lumi kara haddii aan isla markiiba la ururin sida, laakiin aan ku koobneyn, dhiig, DNA, maryo, fiidiyow, ama shay kasta oo la xidhiidha dhacdada. Fadlan wac 780-423-4567 si aad warbixin u soo gudbiso.
- Dhacdada la sheegay kama dhicin Edmonton. Fadlan la xidhiidh adeegga booliiska magaalada uu shilku ka dhacay si aad warbixin u gudbiso.

Wixii aan Gurmad ahayn wac 780-423-4567.

Si aad si qarsoodi ah u soo sheegto wac **kuwa joojiya dembiyada 1-800-222-8477**

Halkan Kaga Warbixi Dhacdo Dhiirigelineysa Nacayb

Qeexidda Dhacdada Nacaybka: Waa **fal aan dambi ahayn** oo lagula kacay qof ama hanti, ujeeddaduna ay ku salaysan

tahay gebi ahaan ama qayb ahaan sifooyin la mid ah kuwan hoos ku xusan:

Dembi Dhiirigelin Nacayb

Waxay u baahan tahay laba qaybood:

1. Dembi laga galay qof ama hanti (tusaale, weerar, xumaan)

2. Caddaynta in dembigu gebi ahaan ama qayb ahaan sabab u ahaa nacaybka qofka
la tuhunsan yahay, cexda ama nacaybka uu u qabo koox la aqoonsan karo oo ku salaysan
midabka dhabta ah ama la dareemayo, isirka, diinta, asalka qaran ama isirka, da'da,
jinsiga, aqoonsiga galmada, aqoonsiga jinsiga ama hadalka, maskax ahaan ama naafo jireed,
ama arrin kale oo la mid ah.

Baarayaasha Dambiyada Nacaybka ee EPS waxay rabaan inay wax ka ogaadaan dembiyada IYO dhacdooyinka aan dembiga ahayn. Ka warbixi iyaga!

WAXA LA SAMEEYO MARKA AAD LA KULANTO NACAYB:

1. Naftaada ilaali
2. Booliiska wac.
3. Ka taxaddar faragelinta ama ka hortagga mawduuca. Tani waxay keeni kartaa inay ka cadhaysiisyaan oo ay xaaladda sii kordhiyaan.
4. Noqo markhaati fiican:
 - Fiiro u yeelo sharraxaadda dadka, dharka, iyo baabuurta ku lugta leh (oo ay ku jiraan taargada baabuurta).
 - Fiidiyow iyo/ama caddayn sawir ahi waxay leedahay qiime, laakiin waa haddii aad si badbaado leh u qabsan karto.
 - Si sugan u sheeg wixii la yidhi.
5. Caawimo u fidi dhibbanaha ilaa inta booliisku ka yimaaddo.

Markaad dhamaystirto warbixintaada onlaynka ah waxa soo socda ayaa dhici doona:

- Waxaad arki doontaa ereyada: "Warbixintaada xagga booliiska Onleyn waa la gudbiyay". Tani waxay muujinaysaa in warbixintaada si guul leh loo gudbiyay.
- Waxaa lagu siin doonaa lambarka warbixinta booliiska oo ku meel gaadh ah
- Dhammaan kiisaska lagu xereeyey habka Warbixinta Onleynka ah waxaa dib loo eegi doonaa 7 maalmood oo shaqo gudahood.
- Marka laga shaqeeyo, waxaad heli doontaa lambarka warbixinta booliiska oo joogto ah kaas oo bedelaya kii ku meel gaarka ahaa.

- Haddii aad warbixintan usoo gudbinayso si aad u bilowdo baadhis boolis waxa kula soo xidhiidhi doona baadhe 10 maalmood oo shaqo gudahood.
- Haddii aad warbixintan usoo gudbinayso ujeeddooyin macluumaad oo keliya, kulama soo xidhiidhi doono.

Luqadaha kale sawir koodkan

Afeef

"Nasiib darrose, adeegga warbixinta onleynka ah waxa lagu heli karaa Ingiriisi keliya waqtigan. Fadlan diyaarso in qof Ingiriisi akhriya uu kaa caawiyo buuxinta foomkan. Haddii aadan awoodin inaad buuxiso foomka, fadlan soo wac khadka EPS ee aan degdegga ahayn 780-423-4567."